"Haddii aad tirisaan nicmada AIle marna ma koobi kartaan badnaan awgeed".

SOONKU WAA CIBAADO CAAFIMAD

SOCIAL HAAM

HUSSEIN ABDIRAHMAN ALI

السَّلاَمُ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَةُ اللهِ وَبَرَكَاتُه

SOONKU WAA CIBAADO IYO CAFIMAAD

"Haddii aad tirisaan nicmada AIle marna ma koobi kartaan badnaan awgeed".

[Sural Ibrahim - 34J

“Nolosha adduunyana ma aha waxaan ciyaar iyo madadaalo ahayn guriga Aakharaana u khayr roon kuwa dhawrsan ee miyeydaan wax kasayn.”

(Suurat al-ancaam:32)

Contact

Mobile: +252907750479 / +252616276782

E-mail:hussein700m@gmail.com

april , 2020.

TUSMADA BUUGA

Hordhac	3
muxuu yahay soon	5
fadliga bisha shacbaan	8
soonka iyo taariku salaadka	9
soonka iyo ramadaanka fadligiisa	10
tiirarka soonka uu ku dhisan yahay	14
wax yaabaha soonka burriya	15
goorma ayaa lala imaanayaa soonka niyaysashadiisa	18
musaafirka soonkiisa	20
habeenka leylatul qadriga	21
fidrada sida loo bixin lahaa	24
iidaha iyo salaadahooda	27
iida xukunkeeda iyo meesha lagu tukanayo	30
waxyaabaha sunada ah maalinta iida	31
habka takbiirta	33
salada iida habeenkeda iyo waqtiga latukanayo	35
su'aalo iyo jawaabo guud	37-55
gunaanad	56

HORDHAC

Waxaan Ku bilaabayaa magaca Allah naxriis guud ahaaneed iyo mid gaareed naxriista

Allah ayaa mahad leh Makhluuqa Rabigood ah, naxriis iyo nabad galyo

korkiisa ha ahaato nabigena Muxamed oo ah midka ugu danbeeya

Rususha, run badanihii amiinka ahaa, oo loo soo diray

Bani Adamka iyo jiniba dhamaantood. Nabadgalyana kor kooda ha

ahaato asxaabtiisa oo ahaa kuwa Xambaarsanaa bandiirada diinta, iyo

dadka wanaaga kuraacay.

Ramadan ka waa bisha 9aad ee jadwalka taariikhda Islaamka waana bisha dadka Muslimka dhamaantood soomaan ayagoo tixraacaya sida uu farayo kitaabka Quraanka ee diinta Islaamka

Bisha Ramadaan waa wakhti dadka Islaamka ah soomaan wakhtiga maalintii; isla markaana cibaadeystaan habeenkii ayagoo tukanaya salaano saa'id ah, sida taraawiixda iyo taajudka.[4]

Sidoo kale, bisha Ramadaan inta ugu badan waxay ku dhamaataa 29 maalmood ilaa 30 maalmood, wakhtigaasi oo lagu bilaabo aragtida dayaxa isla markaana lagu dhamaystiro aragtida bisha. Bishani waana bil dadka Islaamka aad iuo aad ugu muhima. waa

bisha ay waajibka kutahay dadka islaamka ahi in ay soomaan amaba in aanay waxba cunin intaqoraxdu soo jeedo,sidookale raad gaar ah yay bishani islaamka kuleedahay dhaqan ahaan.waana bisha uu soodagay Qur'aankaKariimka ahi.

Sida culimo badan isku raaceen ereyga "Ramadaan" wuxuu asal ahaan ka yimid ereyga Af Carabiga ramiḍa ama ar-ramaḍ, taasi oo macnaheegu yahay kulayl ama qalayl.

Soonku waa mid waajib ku ah dhamaan dadka Muslimka ee qaangaadhka ah, marka laga reebo qofka xanuusan, kan safar ku jira, qof ka da'da ah (gaboow), dumarka uurka leh, dumarka naaska nuujinaya, dumarka dhiiga leh.

Sida ku xusan taariikhda Islaamka, soonka bisha Ramadaan waxaa waajib (wājib) laga dhigay sanadkii labaad ee Hijrada, wakhtigaasi oo dadka Muslimiinta ahaa ka soo qaxeen magaalada Makka ayagoo u socda magaalada Medina.

MUXUU YAHAY SOON?

Soonku waa tiirka afaraad ee shanta tiir ee Islaamka. Wuxuuna ka mid yahay cibaadooyinka kuwa ugu fadliga badan. Sharciguna wuxuu soon u yaqaannaa in soon la niyaysto iyadoo Alle loogu dhowaanayo, lagana reebtoomayo oo la iska daynayo waxyaabaha soonka burriya, inta u dhexaysa marka waagu baryo iyo marka qorraxdu dhacdo. Si loo helo oo loo gaaro ajarka wayn oo Ilaaheey uu ugu talagalay addoomadiisa soonka la yimaada, haddii aan lala imaan niyada soonka, ama aan laga reebtoomin waxyaabaha soonka buriya, sharciga Islaamka uma aqoonsanayo in waxaa lala yimid ay yihiin soon sharci ah.

Sidaa daraadeed qofka muslimka ahi isagoo aan niyo la imaan haddii uu iska daayo waxyaabaha soonka jabiya oo dhan, sida cunidda, cabidda iwm, falkaa uu la yimid iyo rafaadkaa uu maray ma noqonayo mid loogu dhowaado Alle Subxaanahu Watacaalaa (SW), ajarna kama helayo. Sida tusaale ahaan: dadka cunta joojinta sameeya marka ay rabaan inay ka ashtakoodaan dhib ay tabanayaan, ama dadka raba inay iscaateeyaan, amaba duruufo kale oo haysta awgood isaga joojiyey waxyaabaha soonka jabiya.

Bisha Ramadaan

Bisha Ramadaani waa bil khayr, waa bil barako, waxaana Ilaaheey ku gooni yeelay fadiilooyin iyo wanaagyo badan, oo ay ugu horreeyaan kuwan soo socda:

1) Waa bishii Quraanka:

Waxaa la soo dejiyey kitaabkii qatimay oo ugu dambeeyey kutubtii uu Ilaaheey soo dejiyey, waxaana lagu soo dejiyey Nabigii ugu dambeeyey Nebiyaasha Ilaahey (swt) uu soo diray waa Nabi Muhammad(.(ﷺ

2) Waa bishii kutub badan oo kale la soo dejiyey:

Rasuulkuna ﷺisagoo sheegaya kutubtaa iyo marka la soo dejiyey ayuu wuxuu yiri:

Habeenkii ugu horreeyey bisha Ramadaan waxaa la soo dejiyey Suxuftii (Warqadihii) Nebi Ibraahim.

Kitaabkii Tawreet ahaana waxaa la soo dejiyey 6diiRamadaan.

Injiilna waxaa la soo dejiyey 13kii Ramadaan.

Zabuurna waxaa la soo dejiyey 18kii Ramadaan.

Qur'aankana waxaa la soo dejiyey 24kii Ramadaan.

3) Waa bisha ay ku jirto Laylatul-qadrigu:

Laylatul-qadrigu waa habeen ka khayr badan kun bilood (sideetan

iyo sadex sano iyo afar bilood), waana habeen barakaysan. Habeenkaasna wuxuu ku jiraa 10ka bari ee ramadaanka ugu danbeeya.

4) Waa bishii xoraynta:

Waa bil habeen kasta oo ka mid ah Ilaaheey uu dad badan Naarta ka xoreeyo, qof kasta oo muslim ahina uu maalin iyo habeen kasta leeyahay duco laga ajiibayo (laga aqbalayo).

4) Waa bisha shayaadiinta la xiro:

Waa bisha shayaadiinta oo dhan la xiro, albaabada Naarta oo dhanna la xiro, albaabada Jannada oo dhanna la furo. Arrimahaas oo dhani waxay dhacaan oo la sameeyaa habeenka ugu horreeya bishaas. Rasuulkuna ﷺisagoo arrintaa ka hadlaya ayuu wuxuu yiri:

“Marka bisha Ramadaan soo gasho waxaa la furaa albaabada Jannada, waxaa la xiraa albaabada Naarta, waxaana sil-silado lagu xiraa shayaadiinta”.

Xadiisku wuxuu xusay in marka Ramadaanku soo galo shayaadiinta la xir-xirayo, marka la xirxirana way taag darraynayaan oo way daciifayaan, oo ma awoodayaan marka bishaas lagu jiro inay sameeyaan wixii ay samayn jireen marka aan bishaas lagu jirin.

Xadiisku ma dhihin shayaadiinta waa la dilayaa ama way

dhimanayaan, laakiin waxaa kali ah oo uu yiri: waa la xir-xirayaa, shaydaanka xiranina waxaa dhici karta inuu wax dhibo oo haraati, iwm rido isagoo meeshiisa ku xiran, laakiin dhibkiisu wuu ka yaraanayaa midkii uu wadey bishaa ka hor. Maadaama uu xiran yahayna dhibkiisu wuxuu la ekaanayaa hadba qofka uu rabo inuu dhibo inta soonkiisu uu awood leeyahay, oo qofkii soonkiisu dhamaystiran yahay oo xoog leeyahay wuxuu isaga celinayaa si uusan iskaga celin karin qofka soonkiisu xosh-xoshka yahay.

FADLIGA BISHA SHACBAAN

In maalmo badan laga soomo bisha shacbaan:

”Caa’isha (a.k.n) mar ay ka sheekaynaysay soonkii Rasuulka ﷺayey waxay tiri: “Ma aanan arkin Rasuulku ﷺbil uu ka soon badnaa bisha Shacbaan.”

Sidaa daraadeed walaalayaal waxaa nafteyda iyo tiinaba ugu dardaarmayaa inaa bishaan ka faa’ideysano, oo aan soonka badino inteyna bishaan dhamaan, waayo xikmado badan ayaa ku jira soomida bisha Shacbaan waxaa ka mid ah: In ay kuu diyaar gareyneyso bisha Ramadaan. Yacni adigoo soonka la qabsaday ay bishii Ramadaan soo galeyso, saas daraadeed aan ka faa’ideysano fursadaan qaaliga ah!

SOONKA IYO TAARIKU SALAADKA

Waxaa jira dad badan oo muslimiinta ka mid ah oo sooma laakiin aan tukan, sidaa awgeed ayaa waxaa laga yaabaa in dadka qaarkood ay iswaydiiyaan sidee ayuu noqonayaa dadkaa soonkoodu, ma soon dhamaystiran oo Ilaaheey aqbalayaa mase...?

Su'aashaa waxaaan leenahay: Islaamku waa mid is-haysta oo aan kala goo-go'i karin, sidaa awgeed waxaa ruuxa muslimka ah ku waajib ah inuu waajibaadka oo dhan ula yimaado sida ay yihiin, si uu u helo Ilaaheey raalli ahaanshihiisa, uguna guulaysto naxariistiisa.

Tiirarka Islaamka oo shanta ahina waxay la mid yihiin dhisme dhamaystiran, wuxuuna Rasuulka ﷺku tilmaamay salaadda in ay tahay dhismahaa tiir-dhexaadkiisa ama laf-dhabartiisa, waxayna cibaadooyinka kale dheertahay ahmiyad wayn oo dheeraad ah, qofkii iyada ka tagaana wuxuu noqonayaa qof dhismahaa dumiyey. [Akhri ahmiyadda Salaadda]

Qofkii salaadda ka tageyna haddii uu rumaysan yahay inaysan salaaddu waajib ku ahayn uusana ahayn qof Islaamka dhowaan soo galay oo ka jaahil ah iwm, wuxuu noqonayaa mid gaaloobay, oo xerada Islaamka ka baxay, laakiin haddii uu aaminsan yahay in salaaddu waajib ku tahay laakiin uusan xaqqeeda ka soo bixin wuxuu noqonayaa mid faasiq ah, oo iimaankiisu daciif yahay, Islaam-nimadiisuna kala dhiman tahay, haddii uu markaa la yimaado soonka waxaa ka dhacaya soonkii laga rabey, oo aakhiro loo ciqaabi mayo soon la'aan awgeed.

Laakiin wax ajar iyo fadli ah oo uu sugayaa ma jiraan, in Ilaaheey uu isaga naxariisto uun ma ahane. Ilaaheeyna ha ka cabsadeen dadka soomaya oo aan salaadda tukanaynin, hana xasuusteen ciqaabka wayn oo loo diyaariyey dadka salaadda ka taga, waxaana lagama maarmaan ah in la ogaado in qofku wax kasta oo wanaag ama xumaan ah oo uu la yimaado in mid walba buug gooni ah loogu qorayo, oo uu ajar ka helayo wixii uu sifiican u guto, wixii uu ku xad gudbaana dushiisa ay noqonayaan, sida uu Ilaaheeyba u yiri: “Qofkii camal fala oo sameeya wax la’eg Atamka (amaba ka sii yar) oo khayr ah wuu arkayaa (aakhiro oo waxba la duudsiin mayo), qofkii sameeya intaa wax la’eg oo xumaan ahna wuu arkayaa, oo waa la soo hor-dhigayaa”.

SOONKA IYO RAMADAANKA FADLIGIISA

Soonku wuxuu leeyahay fadli wayn, oo qormadeenan aan lagu soo wada koobi karin, laakiin waxaa qaarkiis faah-faahinaysa axaadiistan soo socota:

1) Soonka Jannada ayaa lagu galaa: waxaa laga wariyey saxaabi la yiraahdo Abuu Umaama (a.k.n) in uu Rasuulka ﷺku yiri: “Waxaad itustaa camal aan Jannada ku galo? markaas ayuu Rasuulku ﷺku yiri: Soonka qabso, oo ka adkaaw, wax isaga la mid ahi ma jiraane”.

2) Soonku waa gaashaan Naarta la iska xijiyo: wuxuuna Rasuulka ﷺ

yiri “Soonka waa gaashaan uu addoonku iska xijiyo Naarta”. Soonku wuxuu kala dhex galaa addoonka sooman iyo Naarta, sidoo kale wuxuu ka hor istaagayaa waxyaabaha naftu jeceshahay oo Naarta darbigeeda ah. Naarta waxaa ood looga dhigay waxyaabaha naftu ay jeceshahay, ayna u sahlan tahay inay ku dhaqaaqdo, sida waajibaadka oo laga tago iyo xaaraanta oo la iska dabaasho, ooddaa Naartuna waa mid jilicsan oo ay sahlan tahay in inta laga tillaabsado loo gudbo Naarta. Jannada laftikeedu way u baahan tahay soonka, sababtoo ah Jannada waxaa lagu wareejiyey oo darbi iyo xayndaab looga dhigay waxyaabaha naftu dhibsato oo ku adag, soonkuna wuxuu nafta ka gooyaa waxyaabaha ay marka hore jeceshahay, oo loo yaqaan “Shahawaatka”, laakiin ay dib uga shallayso. Camalka Jannada lagu gaaraa wuxuu la mid yahay buur la fuulayo, midka Naarta lagu gaaraana wuxuu la mid yahay iyadoo buurta laga soo degayo oo kale.

3) Dadka soomani waxay leeyihiin albaab albaabada Jannada ka mid ah, oo layiraahdo “Ray-yaan”, albaabkaa iyaga oo kaliya ayaa loo sii qabtay (loo xajisay), cid kalena ka gali mayso, sida ku xusanba xadiis ay Bukhaari iyo Muslim wada wariyeen.

4) Soonka iyo Qur’aanku waxay u shafeeco qaadaan qofka sooman, oo Ilaaheey ayey kala hadlaan iyadoo soonku leeyahay: Ilaaheyoow waxaan anigu u diiday raashinkiisii iwm, ee shafeeca qaadka aan u shafeeco qaadayo iga yeel. Qur’aankuna uu leeyahay: Ilaaheyoow waxaan u diiday hurdadiisii oo aniga aqrintayda ayuu ku soo jeeday, markaa ayaa Ilaaheey shafeecadooda aqbalayaa oo Jannadiisa

galinayaa. Qofkii wanaag sameeyey oo Qur’aan ku soo jeeday xaaladdiisu waa middaa quruxda badan oo aan xusnay, laakiin qofkii ku soo jeeday turub, dubnad, filin iwm, waa inuu ogaado in waxyaabahaasi aysan Alle SW Janno uga codsan karin, waxay ay qaban karaanna waa lala wada socdaa.

Nabi Muxamed ( ) waxaa laga wariyay inuu yiri:

“Habeenka u horeeya Ramadaan waxaa la xirxiraa shayaadiinta iyo kuwa jinka ugu madaxa adag, albaabada naarta waa la xiraa, oo waxba lagamna furo, albaabada jannadana waa la furaa oo midna lagama xiro, mid dhawaaqa ayaa dhawaaqaya isagoo leh: "ninka khayr doonayow soo jeeso, ninka shar doonayow jooji sharta." Ilaahay wuxuu leeyahay kuwa naarta laga xoreeyo, arinkaasna wuxuu dhacayaa habeen walba oo ka mida habeenada Ramadaan.”

(«إِذَا كَانَ أَوَّلُ لَيْلَةٍ مِنْ شَهْرِ رَمَضَانَ صُفِّدَتِ الشَّيَاطِينُ وَمَرَدَةُ الْجِنِّ، وَغُلِّقَتْ أَبْوَابُ النَّارِ، فَلَمْ يُفْتَحْ مِنْهَا بَابٌ، وَفُتِّحَتْ أَبْوَابُ الْجَنَّةِ فَلَمْ يُغْلَقْ مِنْهَا بَابٌ، وَيُنَادِي مُنَادٍ: يَا بَاغِيَ الْخَيْرِ أَقْبِلْ، وَيَا بَاغِيَ الشَّرِّ أَقْصِرْ . وَلِلَّهِ عُتَقَاءُ مِنَ النَّارِ، وَذَلِكَ كُلُّ لَيْلَةٍ»)

~Waxaa wariyay ibnu Maajah

Sidoo kale bisha Ramadaanka waxaa la soo dajiyay Kitaabka Quraanka waana bil barakysan oo dadka Muslinka u ah waqti aad ugu talo galaan, waa bil dambi dhaaf leh ajarkeedana u ka badanyahay ajarka bilaha kale la sameeyo, waa bil la aqbalo ducooyinka.

Aayad ku jirta Suuratul Al-Baqara ayaa leh:

(شَهْرُ رَمَضَانَ الَّذِي أُنْزِلَ فِيهِ الْقُرْآنُ هُدًى لِلنَّاسِ وَبَيِّنَاتٍ مِنَ الْهُدَى وَالْفُرْقَانِ فَمَنْ شَهِدَ مِنْكُمُ الشَّهْرَ فَلْيَصُمْهُ وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّةٌ مِنْ أَيَّامٍ أُخَرَ يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ وَلِتُكْمِلُوا الْعِدَّةَ وَلِتُكَبِّرُوا اللَّهَ عَلَى مَا هَدَاكُمْ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ .185- وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِي عَنِّي فَإِنِّي قَرِيبٌ أُجِيبُ دَعْوَةَ الدَّاعِ إِذَا دَعَانِ فَلْيَسْتَجِيبُواْ لِي وَلْيُؤْمِنُواْ بِي لَعَلَّهُمْ يَرْشُدُونَ)

Intaas waxaa dheer in bisha barakaysan ee Ramadaan ku jirto habeenka ugu weyn sanadka, taasi oo ah habeenkii Quraanka Kariimka la soo dajiyay, waa habeenka Laylatul Qadar oo ka khayr badan kun bilood.

Allah wuxu yiri subxaanahu watacaalaa:

(إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ)

Ramadaanku waa bisha deeqsinimada iyo khayr falka, iyo wanaaga, waa bisha quraan akhriska la badiyo, oo taraawiixda iyo Tahajudka lagu nooleeyo habeennadeeda, waabisha sadaqada la badiyo sabarkana lagu barto maadaama laga soomayo waxyaabaha naftu jeceshahay oo ay ka midyihiin cunnada cabidda iyo u tagidda cidaha, sabarka ayaan ka muuqan meelaha kale sida uu uga muuqdo soonka, saas daraadeed culumadu waxay yiraahdaan soonku waa sabarka iyo dulqaadka badhkii, Abaal marinta dulqaadkana waa Jannada, ilaahay wuxuu yiri:

قُلْ يَا عِبَادِ الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا رَبَّكُمْ لِلَّذِينَ أَحْسَنُوا فِي هَذِهِ الدُّنْيَا حَسَنَةٌ وَأَرْضُ اللَّهِ وَاسِعَةٌ إِنَّمَا يُوَفَّى الصَّابِرُونَ أَجْرَهُمْ بِغَيْرِ حِسَابٍ)waxaad ku tiraahdaa Adoomadayd i rumeeyayoow Rabbigiin ka dhowrsada kuwa wanaagsanaada aduunkaan waxay leeyihiin wanaag, ilaahay dhulkiisu waa balaadhanyahay, in kale maahee kuwa sabra waa loo oofinayaa abaal marintooda xisaab la'aan.[9][10][11][12]

Sidoo kale bushar ramadaan towbankeeda maalin ee hore waa raxmad, tobanka dhexena waa dambi dhaaf Tobannka ugu dambeeyana waa naarta oo la iska xoreeyo.

TIIRARKA SOONKA UU KU DHISAN YAHAY

Soonku wuxuu leeyahay laba rukni ama laba tiir oo uu ku dhisan yahay, haddii midkood la waayana uu dumayo, labadaa tiirna waxaa kala yihiin:

1) In laga reebtoomo oo aan loo dhowaan waxyaabaha soonka buriya, laga billaabo marka waagu dillaaco ilaa laga gaaro qorrax dhaca.

2) In lala yimaado niyada soonka: sida aan horay u soo xusnayba niyaddu waxay kala saartaa waxyaabaha cibaadada ah iyo kuwa aan cibaadada ahayn, oo aan loogu talagalin in Ilaaheey loogu dhowaado, sida haddii ruux uu iska daayo maalin dhan waxyaabaha soonka jabiya, isagoo ulajeeda mudaharaadid iyo ashtakoosho, markaa wax ajar ah ka heli mayo soonkaa uu la yimid, cibaadana noqon mayo, laakiin haddii uu u niyaysto inuu Alle SW ugu dhowaado,

dabadeedna uu iska daayo waxyaabahaa wuxuu u noqonayaa soonkaa uu la yimid cibaado laga abaal marinayo, Ilaaheey agtiisana qiime ku leh.

WAX YAABAHA
SOONKA BURRIYA

Waxaa jira waxyaabo la doonayo in soonka laga ilaaliyo oo laga dhawro, oo haddii ay soonka isku yimaadiin uu soonku burayo, waxyaabahaasina waa shan waxyaabood oo kaliya, wuxuuna soonku shantaa waxyaabood ku jabaa marka si ula kac ah loo sameeyo, laakiin haddii qofka la qasbo ama uu soonka hilmaamo, dabadeedna uu sameeyo oo uu la yimaado mid kuwaas ka mid ah isagoo hilmaansan, soonkiisu ka jabi mayo, isla marka uu ogaado oo uu soonka soo xasuusto ayuu joojinayaa wixii uu ku jiray, dabadeedna soonkiisa ayuu sii wadanayaa, lagamana rabo wax qallo ah, haddii laakiin qofku uu mid shantaas waxyaabood ka mid ah sameeyo, isagoo u bareeray, soonkiisu waa jabayaa, inta maalintaas ka dhimanna waxaa ku waajib ah inuusan waxyaabaha soonka jabiya u dhowaan, oo uu baaqi ku ahaado una dhaqmo sida dadka sooman oo kale, ilaa qorraxdu ka dhacdo.

Waxaa shantaas ahayn oo soonka jabin karaana kuma jiraan kitaabka iyo sunnada, wax daliil ahna looma hayo, waxaana sida badan muslimiinta diinta ku adkeeya waxyaabo daciif ah, amaba aan asal iyo raad toona diinta ku lahayn, oo mar dambe ku soo kordhay,

sida cadhuufta tirada badan oo dhulkeenii lagu hallayn jiray, dadkana dhuunta ka qallajin jirtay, bal fiiri Allaha na hanuuniyee sida ay dadku ugu dhibtoodeen waxyaabaha aan diinta ka tirsanayn, dhulkiina uu ugu wasaqoobay, qofkuna haddii uu shantaas si-fiican u fahmo wuxuu aad iyo aad u kala garan karaa waxyaabaha soonka jabiya iyo kuwa aan jabin.

Waxayna shantaasi kala yihiin:

1) Galmada (raga iyo dumarka isu tagidooda):

Haddii arrintaasi dhacdo soonku waa jabayaa, waxaana waajib ah in maalintaas sida xaraanta ah loo afuray la soo qalleeyo, intaana waxaa sii dheer sidoo kalena waajib ah in ninka soonkiisa sidaa ku fasahaadiyey uu la yimaado, oo uu bixiyo kafaarogud, wuxuuna ula imaanayaa sidan soo socota:

(A) Wuxuu xoraynayaa qof addoon ah (sida qof dagaal diineed oo dhexmaray muslimiinta iyo gaalada lugu soo qabsaday), haddii uu awoodi waayo xorayntaas xag dhaqaale awgiis ama wayn iyo jirid la'aan uusan addoonkiiba jirin, waba sida hadda taagan oo kalee, wuxuu u gudbayaa darajada labaad, oo ah:

(B) Inuu laba bilood oo isku xigta, kala go'na aan lahayn uu soomo, haddii uusan awoodi Karin inuu labadaas bilood soomo wuxuu haddana u gudbayaa darajada saddexaad, oo ah:

(C) Inuu quudiyo oo raashin sooyo lixdan miskiin. Haddii uu saddexdaa qaybood uu midna awoodi waayo kafaaradii way ka dhacaysaa, sababtoo ah Rasuulka ﷺayaa waxaa u yimid nin falkaa ku kacay maalin Ramadaan, tabar iyo awoodna u waayey inuu kafaarogud sameeyo, wuxuuna markaa ka riday kafaaaro gudkii, isagoona siiyey timir uu reerkiisa siisto, maadaama uu ka cabtay faqri fara-goys ah, Ilaaheeyna dadka kuma uu waajibiyo wax aysan awoodin.

Laakiin haweentii soonkeedu sidaas ku fasahaaday iyada lagama rabo kafaarogudka ninka laga rabo, ee waxaa laga rabaa wixii ka soo hara.

2) Is-matajinta:

Haddii qofku si ula kac ah isku matajiyo, soonkiisu wuxuu noqonayaa mid buray, laakiin haddii mataggu ka awood bato oo isagu uusan iska raad-raadin, dabadeedna uu matago soonku ka jabi mayo, waxaa sidaas la mid ah haddii qofku uu rabey inuu cadaysado, dabadeedna uu sidaas ku matago isagoon isagu rabin inuu matago, markaas oo kale soonku ka jabi mayo, waxaa Abuu Hurayra (a.k.n) laga soo wariyey inuu Rasuulka ﷺyiri “Qofkii mataggu ka awood bato oo sidaa uu uga yimaado wax qalle ah lagama rabo, qofkiise isagu is-matajiya isagoo ula kacaya ha soo qalleeyo soonka”.

3-4) Cunitaan iyo Cabitaan:

Haddii qofku isagoo soonka og uu wax cuno ama cabo soonkiisu waa jabayaa, laakiin haddii uu wax cuno ama cabo isagoo la qasbay ama hilmaansan inuu sooman yahay, soonkiisu jabi mayo, sida Rasuulka ﷺu yiri “Qofkii sooman oo wax cuna ama caba isagoo hilmaansan soonkiisa ha dhamaysto oo ha sii wato, Ilaaheey ayaana wax uu cuno iyo wax uu cabo siiyey”, marka uu soo xasuusto oo ay ku soo dhacdo inuu sooman yahay waxaa laga rabaa inuu raashinka iska joojiyo, dabadeedna soonkiisa sii wato.

5) Imaashaha dhiigga caadada (xaylka) ama dhiigga nifaaska oo yimaada ka dib marka haweenku dhalaan:

Marka dhiiggaasi yimaado soonku waa jabayaa, waxaana kaliya oo laga doonayaa haweentaa muslimadda ah oo dhiiggaasi ka yimid in marka soonku dhamaado ay soo qallayso intii maalmood ee dhaaftay, iyadoo wax dambi iyo daalac ah aan loo raacanayn, sababtoo ah kuma aysan kicin wax dambi ah, ee sidii la faray ayey samaysay.

GOORMA AYAA LALA IMAANAYAA SOONKA NIYAYSASHADIISA

Soonka waajibka ah sida Ramadaanka, soonka kafaara gudka iyo midka la nadray (la sharday, sida iyadoo la yiraahdo Ilaaheeyoow haddiii aad I caafido maalin ayaan soomayaa, iwm). Soonku waajibka yahay waxaa ku wajib ah qofka soomaya inuu soonka niyaysto, inta u dhexaysa marka qorraxdu dhacdo iyo marka waagu

baryayo, inta u dhexaysa labadaa waqti haddii uu soonka niyaysto soonkiisu wuxuu noqonayaa mid sax ah, haddii uu si ula kac ah uga tagana soonkiisu ansixi mayo, sida uu Rasuulkuba ﷺu yiri:

“Qofkii niyada soonka aan soo go’aansan, oo aan soo sugin waa bariga ka hor, soon uma jiro.”

[Waxaa wariyey Tarmiidi, Abu Da’ud, Wanisaa’I, iyo Daaramiye oo uu ku wariyey kitaabkiisa Isnaadu Saxiix].

Laakiin qofkii niyada habeenkii hilmaama ee subaxdii xasuusta, amaba aan ogayn in bishii soonku dhalatay, ee ka dib markuu wax cunay ama cabay ogaada in ay Ramadaan tahay, waxaa laga rabaa in isla marka uu xasuusto ama ogaado uu niyada la yimaado, soonkiisana halkaa ka siiwato, wax qallo ahna lagama rabo, dhibna ka soo gaari mayo hilmaankaa ama ogaan la’aantaa, sababtoo ah Rasuulka ﷺayaa wuxuu yiri:

“Ilaaheey wuxuu ummaddayda ka daayey oo ka dejiyey wixii ay ku gefaan, wixii ay hilmaamaan, iyo wixii lagu qasbaba.”

[Waxaa wariyey Ibnu Maajix, iyo sh. Albaani oo uu ku wariyey kitaabkiisa Irwaa].

Qofkii soonka u suxuurtaana wuxuu la mid yahay qof niyadii la yimid, sababtoo ah qofkaasi wuxuu u suxuurtay inuu Alle ugu dhowaado iyo inuu awood u yeesho soonka, maadaama uu sidaa

awgeed u suxuurtayna waxaa laga helay ulajeedkii la rabey, oo ahaa in soonku uu noqdo mid Alle loola jeedo, uuna ka soocmo cunta iska joojinta, iwm.

Niyadu waa shaqo qalbigu qabto oo aan dadku daalacan karin, sidaa awgeedna marka lala imaanayo afka looga dhawaaqi mayo, korna loo qaadi mayo niyaysiga, sida dadka qaarkoodba ay sameeyaan, oo marka salaadda Maqrib la tukado ka dib ayaa meelaha qaarkood waxaa ka dhici jirtay ogaanteey in imaamka lagu yiraahdo noo xir soonka, dabadeedna markaa ayuu u meerin jiray, iyadoo iyaguna ay ka daba meersanayaan, soonka iyo cibaadooyinka kalena wasy ka siman yihiin in aan waxa la niyaysanayo afka looga dhawaaqayn, sidan horay u soo xusnayba.

MUSAAFIRKA SOONKIISA

Waxaa u bannaan oo loo rukhseeyey qofka musaafirka ah inuu iska afuro haddii bil Ramadaan lagu jiro, waxaana rukhsaddaas la siiyey qof kasta oo musaafir ah, waxaana aan kala duwanayn qofka soonka ku rafaadaya oo aad ugu dhibtoonaya, sida dadka lugta ku safraya, gaar ahaan dhulka kulaylaha ah, iyo qofka aan rafaadkaas marayn, sida dadka diyaaradaha, maraakiibta, baabuurta, tareennada ku safraya qaarkood.

Xigmad wayn ayaana ku jirta rukhsaddaa iyaga oo dhan la wada siiyey, sababtoo ah safarku sidiisaba waa mid rafaad iyo dhib aan ka marnayn, haba lagu kala badnaadee, oo waxaa laga yaabaa in qofku

meel uusan aqoon u safro, dabadeedna uu lumo, ama meel uu wax ka gato uu waayo, amaba inuusan af-garanayn dadka ku nool meesha uu u safray, wuxuuna Rasuulku ﷺku tilmaamay safarka inuu yahay qayb ama jab cadaabta ka mid ah, wuxuuna Abuu Hurayra (a.k.n) ka soo wariyey Rasuulka ﷺinuu yiri:

“Safarku waa cad ama qayb cadaabta ka mid ah, wuxuuna qofka u diidaa hurdadiisa, cuntadiisa iyo cabitaankiisa, ee qofku marka uu dantiisa dhamaysto ha u deg-dego reerkiisii iyo ciddiisii.” [Waxaa wariyey al-Bukhaari]

Qofka Mar Walba Ama Badanaaba Safar Ku Jiraa Ma Afuri Karaa?

Haa, waa afuri karaa, sababtoo ah afuridda looma bannayn qofkii mar kaliya safraya oo kaliya, ee waxaa loo banneeyey qof kasta oo safar ku jira, haba noqdo mid badanaaba safar ku jira, sida dadka diyaaradaha, tareennada, tareellada iwm wada, oo marna waddada ku sii jira, marna ku soo jira.

HABEENKA LEYLATUL QADRIGA

Marka hore Ramadan Wacan. Wabacdi, sidaa la wada soconaba waxaaa ku dhex jirnaa tobankii habeen ee bisha Ramadan ugu danbeysay, tobankaas habeen oo ay ku jirto habeen la yiraahdo “Habeenkii Leylatul-Qadri”.

Marka waxaa su’aal u baahan inaa is weydiino maxay habeen kaasi habeenada kale uga duwan tahay ama uga fadli badan tahay?

Jawaabtu waa sida soo socota.

Laylatul-Qadriga waa habeen fadligiisu aad iyo aad u wayn yahay, waxaa ka mid ah:

(1) waa habeen camalka la qabtaa uu ka khayr badan yahay midka la qabto kun bilood (yacni 83 sanno iyo 4 bilood) oo habeenkaas uusan ku jirin.

(2) waa habeenkii Quraanka Lawxul-Maxfuudka laga soo dejiyey, iyadoo la keenay meel la yiraahdogurigii Cizziga iyo Sharafta, dabadeedna qayb-qayb Nabiga ﷺloogu soo dejiyey, muddo saddex iyo labaatan sano gudohood ah.

(3) waa habeenka Lawxul-maxfuudka laga soo dejiyo oo laga soo qaado sannadka waxyaabaha dhacaya, sida wixii dhimanaya, wixii dhalanaya, risiqa iwm, iyadoo loo keenayo oo loo dhiibayo malaa'igta u xilsaaran arintaas.

(4) Waa habeen malaa'igta la soo dejiyo, iyadoo uu ka mid yahay Malaku Jibriil, habeenkaa Allaah (swt) ayaa karaameeyey, kitaabkiisa ku xusay. Waxaana qof kasta oo muslim ah u haboon ah inuu ku dadaalo sidii uu u haleeli lahaa habeenkaas qaaliga ah, oo uusan u seegi lahayn, habeenkaasi waa habeen Ilaaheey uu ummaddaan u gaar yeelay, qofkii haleelana khayr dhamaantiis ayuu haleelay.

Rasuulkuna ﷺisagoo fadliga habeenkaas ka hadlaya ayuu wuxuu yiri:

“Qofkii Laylatul-Qadriga kaca (yacni habeenkaa cibaado sameeya) isagoo aaminsan, ajar iyo xasanaadna Ilaahey ka dalbanaya waxaa loo dhaafayaa dambigiisii hore”. [Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim]

Habeenkaas maadaama uu yahay mid fadli wayn leh, ahna mid aad iyo aad qofka muslimka ah ugu muhiim ah, ayaa asaxaabtu waxay jeclaysteen inay ogaadaan habeenka uu yahay, qaar iyaga ka mid ahi waxayba ku riyoodeen inay ku jirto tobanka ugu dambeeya soonka, markaa ayaa Nabiga ﷺwuxuu yiri:

“Ku dadaala Laylatul-Qadriga habeennada tirada is-dheer (kisiga) ah, sida 21, 23, 25, 27, iyo 29, oo ku jiraan tobanka ugu dambeeya Ramadaanka.” [Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim]

Markii uu Rasuulku ﷺsidaas yiri ayaa waxaa la ogaaday inay ku jirto tobanka ugu dambeeya soonka, gaar ahaan habeennada kisiga ah, laakiin axaadiista badankood waxayba sii cayimeen oo ay sheegeen inay tahay habeenka 27-aad, iyo kuwa kaleba waxaa haboon in dadaal dheeraad ah la sii-siiyo, oo si fiican loogu dadaalo, iyadoo cibaado lagu soo jeedayo.

Hadaan Ogaado Habeenka

Leylatul Qadriga Maxaa Leeyahay?

Maadaama asaxaabtu aysan ogolayn in waqti muhiimaddaas lehi uu dhaafo, ayaa Caa'isha oo ahayd xaaskii (sowjadii) Nabiga ﷺwaxay Rasuulka ﷺku tiri: Haddii aan ogaado habeenka uu yahay Laylatul-Qadrigu maxaan leeyahay? Markaas ayuu ku yiri:

Waxaa aqrisaa ducadatan:

" اللَّهُمَّ إِنَّكَ عَفُوٌّ تُحِبُّ الْعَفْوَ فَاعْفُ عَنِّي "

"ALLAAHUMMA INNAKA CAFUWWUN, TUXIBBUL CAFWA, FACFU CANNII"

....oo ay macnaheedu tahay

"Ilaaheeyoow waxaad tahay Ilaah cafin badan, jecelna cafinta, ee i cafi."

[Waxaa xaddiiska wariyey Axmed Ibnu Maajah iyo Tarmidi]

FIDRADA SIDA LOO BIXIN LAHAA

"Fidrada macnaheeda:
Waa sadaqo labixiyo soonka markii la furo."

Fidrada waajibnimadeeda waxa cadayn u ah:

Cabdullaahi Ibnu cabaas wuxuu yiri (Allah haka raali noqdo) Nabiga ﷺwuxuu nagu waajibiyay fidrada wuxuuna yiri waxay daahirinaysaa qofki soomanaa qaladyadi ka dhacay sida hadaladii macna la'aanta ahaa iyo caayda iyo wixii la mid ah.(1)

Waqtiga ay waajibto iyo qofka ay ku waajibto

Waxay wajibtaa maalinka ugu danbeeyo bisha soon,(2) (asxaabta rasuulka ﷺwaxaa ka sugnaatay inay bixiyeen maalin ama laba maalmood ka hor maalinka ciida ah,(3) waxaa ugu danbaysa bixinteeda marka salada ciida lagalo),waxay ku waajibtaa qofkasta oo muslim ah oo haysta wuxuu cuno asaga iyo dadka uu masuulka kayahay maalinka ciida ah iyo habeenkeeda wax ka dheeraad ah.(4)

Cabirka La Bixinaayo Iyo
Noocyada Lagu Bixinaayo

Abii saciidul khudri alaha ka raali noqdee wuxuu yiri waxaanu ahayn kuwa bixiya xiligi nabiga) ﷺsaac oo raashin ah)(5) saacu wuxuu u dhigmaa labo kiilo iyo afartan garaam, cuntada la bixinayo waa cuntada dadka badankii cunaan sida bariiska, baastada, burka, sonkorta, qamadiga…. i.w.m.(6) Nabiga ﷺiyo asxaabtiisa alaha ka raali noqdee kama sugnaanin inay lacag ku bixiyeen taa macnaheeda wuxuu yahay lacag laguma bixin karo, laakiin lacagta aad ku bixiseen waa in raashin loogu gadaa masaakiinta, ee aanan lagu siin lacag cadaan ah.

Yaa la siinayaa

Qofkasta oo miskiin ah iyo todobada kale ee ay aayda sheegtay,(7) waxaan ajar badan, oo waliba afdal ah inaad siiso masaakiinta magaalada kula joogo,(8) miskiinka waa qofkasta oo wixiisa aysan ku filnayn.

See loo bixinayaa

Qofkasta inuu raadiyo miskiinka(9)

1 ehelkiisa.

2 dariskiisa.

3 qofkasta oo muslima ah.

Fure:

Abuu Daawuud 1371. Can Ibnu Cabaas.

Ibnu Qudaama fii Almuqnii Kitaabka 2 fasal waqtu wujuub zakaat alfitir.

Albukhaari Can Naafic Can Ibnu Cumer.

Almajmuuc LiANnawawii Kitaabka 6.

Bukhaari 1414.

Iclaam Almuwaqiciin Li Ibnu Qayim Kitaabka 2.

Alum li Alshaaficii baab daycatu Zakaatu Alfitir qabla qasmihaa.

Muwata'a Maalik Kitaabka 1 Baab fii ikhraaj almusaafir zakaat alfitir.

Almukhtasar Li Alshaaficii walmajmuuc Li ANnawawii Kitaabka 6.

IIDAHA IIYO SALAADAHOODA

Walaalayaal maadaama aan la wada socono in ay fooda nagu soo heyso maalintii faraxa badney, ee aheyd "Ciidul Fitriga" ayaa waxaa jeclaadey inaan wax ka ogaano maalintaa iida ah iyo waxa qofka muslimkaa looga baahan yahey. Sidaa awgeed waxaa idiin soo gudbinaayaa macluumaad ku saabsan iidaha iyo salaadahooda, ee fadlan markaa aqirsatid ku camal fal una sii gudbi dadka aad taqaanin.

Ciiduhu waa kuwo fac wayn, oo waxaa ummad kastaa lahaan jirtay ciido ay iidaan, munaasabad kasta oo waynna waxay ka dhigan jireen iid ay iidaan, faraxooddana ay muujiyaan, ka dib markii Islaamku yimid ayuu wuxuu bedelay iidihii hore, isagoo ku bedelay iido ka khayr badan, waxaana ku sugan xadiis saxiix ah oo uu wariyey Abuu Daawuud in Rasuulka ﷺuu magaalada Madiino yimid, iyadoo reer

Madiina ay leeyihiin laba maalmood oo ay ciyaaraan, markaas ayuu Rasuulka ﷺwaydiiyey iyaga waxay ay yihiin labadaas maalmood, markaasayna ku yiraahdeen:

Waa laba maalmood oo aan waagii jaahiliyada aan ciyaari jirnay,

Markaas ayuu ku yiri:

“Ilaaheey wuxuu idinkugu bedelay labadaa maalmood laba ka khayr badan oo kala ah maalinta Ciidul-Fitriga iyo maalinta Ciidul-Adxada, labadaa iidood Ilaaheey ayaa ummadda Nabi Muxammed ﷺsiiyey.”

Waxayna labadaas iidood ka daba maraan laba tiir oo waawayn oo ka mid ah shanta tiir ee Islaamka, labadaas oo kala ah: soonka iyo xajka, maalmahaa inay dadku nafta u raaxeeyaanna waxay ka mid tahay waxyaabaha Ilaaheey uu jideeyey, sidaa awgeed waxaa banaan ciyaaraha nooc kasta oo ay yihiinba, haddii laga ilaaliyo waxyaabaha shareecadu aysan ogolayn, sida cawrada oo la banneeyo, ragga iyo dumarka oo is-dhex gala, sidaas oo kale waxaa bannaan heesaha, laakiin waa inaan ruuxna lagu caynayn, wax xunna aan lagu faafinayn, laguna faaninayn sida qamro iwm, muustikana aan la raacsiinayn.

Waxaana isku mid ah ragga iyo dumarka, waxaa uu xusay xadiis saxiis ah oo ay wariyeen culummo ay ka mid yihiin Bukhaari iyo Muslim in: “Maalin iid ah iyadoo ay ku ciyaarayaan masjidka Rasuulka ﷺniman Xabashi ahi uu Rasuulku ﷺCaa’isha (a.k.n) u

yeeray, dabadeedna ay fiirsatay ciyaartoodii ilaa ay ka bogatay, iyadoo weliba ciyaarta ka fiirsanaysey oo taagnayd Rasuulka ﷺ gadaashiisa, iyadoo dhabankeedu uu saarnaa dhabankiisa, wuxuuna Rasuulku ﷺmaalintaa yiri: “Ha ogaato Yahuuddu in diinteeennu ay leedahay fasax iyo waqti damaashaad iyo tamashlayn.”

Sidoo kale waxay wariyeen Bukhaari iyo Musim in: “Caa’isho ay tiri: maalin iid ah ayaa iyadoo ay ila joogaan laba gabdhood oo heesaya, ayaa waxaa ii soo galay Rasuulka ﷺ,dabadeedna ku seexday firaashka, wuxuuna huwday maro, dabadeedna waxaa soo galay Abuu Bakar, wuxuuna canaantay labadii gabdhood isagoo diiddan waxa ay Rasuulka ﷺku ag samaynayaan, markaas ayuu Rasuulku ﷺ maradii iska fayday, kuna yiri Abuu Bakar: “iska daay, qolo waliba waxay leedahay iid, middaanina waa iiddeeniiye”, laakiin waxaa la rabaa in falalka lagu kacayo oo muujinaya farxadda iyo rayn-raynta sida cuntada, cabitaanka iyo ciyaaruhuba aysan xadkooda dhaafin, Ilaaheey ka cabsashaddiisana aan la hilmaamin.

Islaamka ma lahan iido aan ahayn kuwaa aan soo xusnay, laakiin dadka badan oo muslimiinta ka mid ah ayaa waxaa lagu emteleeyey inay samaystaan iido kuwaa Islaamka aan ahayn, sida iidda maalinkii dhalashada Rasuulka ﷺ,habeenka la yiraahdo “Laylatut-Micraaj”, iidda dhalashada qofka, iyo iido loo sameeyo boqorrada iyo madaxwayneyaasha, sida maalinta ay kursiga xukunka ku fariisteen, maalinta dalku xornimada qaatay iwm, oo ka mid ah iidaha bidcada ah oo shareecada wax idan ah aan ka haysan, waxaana aan bannaanayn in iidahaas la jideeyo ama la sameeyo, waxaa sida

Kirismiska iyo sannadka cusub oo loo yaqaanno “Habbi niyuu yeer/Happy new year” iwm.

“IIDA” XUKUNKEEDA IYO MEESHA LAGU TUKANAAYO

Waxay culummada Islaamka isku qilaafeen xugunka ay iidda tukashadeedu sharciga ku leedahay, markaa ayaa qaarkood waxay yiraahdeen waa sunno, qaar kalena waxay yiraahdeen waa waajib, iyadoo rag iyo dumarba ay isku mid yihiin, sidan dambe ayaana xoog badan, waxaana u daliila ah in Rasuulka ﷺuu amar ku bixiyey inay iidda yimaadiin rag iyo dumarba, xataa gabdhaha aan la guursan gurigana aan ka soo bixin (maqbiyooyinka), iyo kuwa dhiigga caadada qaba, markii sidaas la is amray ayaa haweeneey asaxaabta ka mid ahi Rasuulka ﷺwaydiisay sida ay samaynayso haweentii aan haysan jilbaab ay ku timaado meesha lagu tukanaayo, markaas ayuu Rasuulku ﷺku yiri: “walaasheeda muslimada ahi ha soo siiso jilbaab.

Dumarka kuwooda caadada qabaa iyagu wax ka tukan mayaan, laakiin waxay joogayaan meel u dhow meesha lagu tukanayo, dadkaa muslimiinta ah ayey la takbiirsanayaan (Allaahu akbar ayey wax ka leeyihiin), wayna la ducaysanayaan, barakada iyo khayrka maalintaa jira iyagoo rajaynaya, Rasuulkuna ﷺweligiis kama uusan tagin salaaddan.

Iidda waxaa lagu tukan jiray waagii Rasuulka ﷺmeel bannaan, beledkana ka baxsan, oo loogu talagalay iidaha iwm in lagu tukado,

iyadoo salaadda lagu tukado masjidka Rasuulka ﷺay u dhiganto kun salaadood oo meel kale lagu tukado (marka laga reebo Masjidul-Xaraam), ayaa haddana uusan Rasuulku ﷺku tukan masjidkiisa salaad iid ah, hal marna Allaha ka dhigee, sidaa awgeed ayaa waxaa sunno ah in lagu tukado meel bannaan oo dadka la iskugu keeno, haddii duruuf dadka u diidaa aysan jirin, isku imaatinkaas wayn oo loo dhan yahayna xigmado badan ayaa ku jira, oo ay ka mid yihiin muslimiinta oo calaamadaha diinta Islaamka lagu garto mid ka mid ah muujinaya, sidoo kalena muujinaya walaalnimada muslimiinta, midnimadooda, iyagoo isbaranaya, iskaalmaynaya, isla markaana kalimada (diinta) Alle sare u qaadaya.

WAXYAABAHA SUNNADA AH MAALINTA "IIDA"

Maalinta iidda waxaa sunno ah in lala yimaado waxyaabahan soo socdo:

1) In dhar wanaagsan la soo xirto marka salaadda iidda laga soo qayb galayo, Rasuulkuna ﷺmaalmaha iidaha wuxuu soo xiran jiray dharkiisa kuwa ugu qurxoon, in maalintaas la is qurxiyaana waxay ahayd caado wanaagsan, Rasuulkana ﷺka sugnaatay, sidan soo xusnayba. Waxaa sidoo kale sunno ah in la isi soo carfiyo, oo la soo marsado waxyaabaha udgoon.

2) In iidda loo soo qubaysto, arrintaani Rasuulka ﷺkama aysan sugnaan, laakiin asaxaabta ayey ka sugnaatay.

3) In marka laga soo noqonayo salaadda iidda lugu soo noqdo waddo aan ahayn middii marki

3) In marka laga soo noqonayo salaadda iidda lugu soo noqdo waddo aan ahayn middii marki hore la soo qaaday, sidii uu Rasuulkuba ﷺ samayn jiray maalmaha iidaha.

Salaadda loo baxayaa haddii ay tahay midda Iidul-Fitriga waxaa sunno ah in wax la soo cuno inta aan la soo aadin, gaar ahaan timir tiro is-dheer (kisi) ah. Haddii ay Iidul-Adxaa tahayna waxaa sunno ah in la soo aado iyadoo aan waxba la soo cunin.

4) In marka maalinta iidda la kulmaba la isku tahinyadeeyo, iyadoo la leeyahay: “Annaga iyo adinkaba Allaha naga aqbalo”, sidaasina waa sida asaxaabtii Rasuulku ﷺay isugu tahniyadayn jireen markii ay kulmaan maalin iid ah. Laakiin waayahaan dambe waxaa lagu bedeshay wixii sugnaaday oo la soo wariyey arrimo aan kuwaa xiriir la lahayn, sida iyadoo dadku isku yiraahdiin: “Kullu caam, wa antum bikhayr”, sidaasi iwm, waa ku bedelasho wixii wanaagsanaa lagu bedeshay wax liita oo aan qiimo lahayn.

5) In la takbiirsado (Allaahu akbar la yiraaho) marka guriga laga baxo ilaa salaadda laga tukado, iyadoo dadku aysan isla qaadayn, ee qof waliba goonidiisa u takbiirsanayo, laakiin in la isla takbiirsado oo la isla qaado sida dadkuba sameeyaan sunnada kuma sugna, ee sidaas ha loo ogaado. Haddii Iidul-adxaa ay tahay iiddaasi intaa waxaa u dheer in saddexda maalmood oo iidda ka dambaysa ay

sunno tahay in la takbiirsado, waxaana takbiirta la joojinayaa saddexdaa maalinta ugu dambaysa Casarkeeda, waxaana la takbiirsanayaa iyadoo takbiirtu aysan ku xirnayn waqti gooni ah.

6) Kutubta qaarkood ayaa waxaa yiraahdeen oo ku gooni yeeleen takbiirta marka salaadaha waajibka ah la tukado dabadeed, laakiin wax daliil ah oo sidaas sugaya (awood siinaya) ma cuskana, sidaa awgeed kuma xirna takbiirtaas ilaa saddexdaas beri soconaysaa salaadaha gadaashood , ee waqti kasta ayaa la takbiirsanayaa, sidaas waxaa la mid ah oo aan iyaguna daliil haysan culummada qaar oo yiraahdeen habeenka iiddu soo gasho ayaa takbiirtu soo billaabanaysaa, ee marka salaadda iidda la aado billaaban mayso. Sida Rasuulka ﷺka sugnaatayna waa sidii aan horay u soo xusnay, ee si-fiican ha loo indha-indheeyo.

HABKA TAKBIIRTA

Habka loo takbiirsanayo oo asaxaabtii qaarkood ka sugnaaday waa midkan soo socda:

الله أكبر ، الله أكبر ، الله أكبر ،
لا إله إلا الله ، الله أكبر،
الله أكبر ولله الحمد

Allahu-Akbar, Allahu-Akbar.
La ila-ha ill-lal-lah.
Allahu-Akbar, Allahu-Akbar.

Wa-lilahill xamdu.

* * * *

Allah is great, Allah is great.
There is no god but Allah.
Allah is great, Allah is great.
And all praises are for Allah.

“Allaahu akbar allaahu akbar, laa ilaaha illallaahu, wallaahu akbar, allaahu akbar walillaahil xamdu”, ama “Allaahu akbar, Allaahu akbar, Allaahu akbar, walillaahilxamdu, Allaahu akbar, wa ajjallu, Allaahu akbar calaa maa hadaanaa,”

Laakiin qaybta hore ayaa caansan ahna midda saxiixnimada badan, iintani waa inta la soo wariyey iyada oo sugan, laakiin sidii hadba wax loogu darayey ayey waxay hadda gaartay in uusan xifdiba karin qof aan taqasus u lahayni, inuu dadka meersanaya la meersado ma ahane.

Waxyaabaha lagu siyaadiyey waxaa ka mid ah:

“Allaahumma salli calaa sayidinaa Muxammad, wacalaa aali sayidinaa Muxamaad…ilaa iyo dhamaadka”, iyo “Laa ilaaha illalaahu waxdahuu, sadaqa waxdahuu, wanasara cabdahuu, wahazamal axzaaba waxdahuu”.

Inta sugan ayaana waxay nooga filan tahay inta gadaal ka gaarka ah oo aan sugnayn, ee sida ha loo ogaado.

SALAADA IIDDA HABKEEDA & WAQTIGA LA TUKANAAYO

Waxaa salaadda iidda la tukanayaa inta u dhexaysa marka qorraxdu soo baxdo oo ay kor u soo kacdo, ayna soo gaarto ilaa saddex mititir oo kale, iyo marka qorraxdu cirka bartankiisa dhaafto. Iidul-Adxada tukashadeeda waa la soo dedejinayaa, si dadku ay udxiyada qaliddeeda fursad ugu helaan. Iidul-Fitrigana xoogaa ayaa dib loo dhigayaa, si dadku ay u helaan waqti ay ku bixiyaan Fitrada, waxaana labada iidood salaaddooda loo tukanayaa sidan soo socota:

È) Salaadda ayaa la xiranayaa, iyadoo aan laga hormarinayn adimid iyo aqimid taana, marka la xirto dabadeedna todobo (7) goor (oo aysan ku jirin takbiirta salaadda lagu xiranayo) ayaa la takbiirsanayaa (Allaahu akbar la leeyahay), iyadoo aan gacmaha kor loo qaadayn, sababtoo ah marka todobadaa goor la takbiirsanayo in gacmaha kor loo qaadaa Rasuulka ﷺ kama sugnaan, sidoo kale waxaan la soo warin in dadka ma'muumiinta ahi ay takbiirta kor u qaadayaan, sidaa awgeed waxaa la rabaa in hoos takbiiraha loola yimaado, marka laga reebo imaamka o isaga laga rabo inuu kor u qaado.

Dabadeedna Faatixada iyo suuradda la yiraahdo:

“Sabbixisma” ama “Qaaf” ayaa imaamku aqrinayaa, isagoo kor uqaadayaa aqrintooda, marka rakcada koowaad laga soo istaagana shan goor ayaa la takbiirsanayaa, iyadoo gacmaha kor loo qa adayn sidii hore oo kaleba, dabadeedna wuxuu aqrinayaa Faatixada iyo suuradda la yiraahdo Suurat “Al-Ghaashiya” (Hal-ataak) ama suurat “Al-Qamar” (Iqtarab).

Ê) Markii rakcada labaad laga salaama naqsado ka dibna waxaa sunno ah in la khudbeeyo hal khudbo, oo aan mid kale laga daba marinayn, iyadoo dadka lagu boorrinayo inay Alle ka cabsadaan, lana amrayo wax kasta oo wanaag aakhiro ama mid adduunyo ku jiro, loona sharxayo arrimaha iidda la xiriira haddii laga jaahil yahay. Khudbadana waxaa lagu billaabanaya a Alle ku xamdintiisa “Alxamdu lillaah”, ee lagu billaaban mayo takbiirsi “Allaahu akbar”, sida dadka qaarkoodba aaminsan yihiin.

Haddii qofku uu hilmaamo takbiirihii aan soo xusnay amaba qaarkood, takbiirtaas uu hilmaamay salaaddiisa waxba uma dhibi karto, mana soo qallaynayo, laakiin wuxuu la imaanayaa sujuudda sahwiga. Hadiise uu ma’muum yahay oo isaga kaliya uu hilmaanka la yimid wax sujuud ah la imaan mayo.

Qofka Salaadda ”Iida” Ay Dhaafto

Qofkii ay dhaafto inuu iidda jamaacda la tukado wuxuu kaligii s (ama dadka la midka ah) iska tukanayaan laba rakco oo salaaddii iidda ah, habka tukashadana waa soo xusnay.



Ramadanka waa tiir ka mid ah shanta tiir ee Islamka

SU´AALO IYO JAWAABO GUUD

1. Soonka horta ma la aqbalayaa haddii uu qofku doorto inuu soomo inkastoo uu khatar la hubo u keenayo caafimaadka?

Jawaab:

Sida kor lagu sheegay, dadka buka waa laga dhaafay soonka.

Qofka loo arkayo inuu qabo xanuun ku filan si looga dhaafo

soonka waxa ugu fiican in uu go´aamiyo dhakhtar muslim ah oo waayoaragnimo u leh soonka, iyo aqoon ku sahabsan shuruucda

khusaysa soonka iyo waxa qof ka dhaafaya waajibka soonka.

Xataa dhakhtar aan muslim ahayn oo khibrad dhakhtarnimo leh ayaa bixin kara talo wanaagsan isagoo ka eegaya dhinaca caafimaadka. Noloshu way ku wayn tahay Islaamka, Ilaahayna wuu Dambidhaaf iyo Naxariis badan yahay Wuxu ku caddeeyay

Qur´aanka:

”Kuma kallifno qofna wax aan karaankiisa ahayn…” (23:62).

In la soomo marka soonku khatar la hubo ku keenayo caafimaadku, waa xaaraam.

2. Ma soomayaa qof macaan qabaa?

Jawaab:

Dadka si fiican gacanta ugu haya macaankooda iyagoo ku maamulaya cunto ama kiniinno, way soomi karaan.

Dadkaasi waxa ay u baahnaan karaan iyagoo uu dhakhtarku u qorayo in ay beddelaan qaadashada dawada

oo ay qaataan kiniinnada ka hor iyo ka dib
soonka maalintii. Laakiin waxa lagula talinayaa
in aanu soomin haddii uu qofku qaato insuliin
si uu u maamulo xanuunkiisa macaaanka.

Laakiin dadku way ku kala duwan yihiin sida jidhkoodu u
qaato insuliinta iyo markaa heerka
sonkorta dhiiggooda. Sidaa daraadeed waa in
suurtogalnimada in uu soomo qofka
macaanka qaba ee lagu daweeyo isuliinta, loo
go´aamiyo shakhsi ahaan.

2: Waxa igu dhaca dhanjaf adag marka
aan ka boodo wakhtiyada cuntada
waanu ka sii daraa marka aan soomanahay Ma soomayaa gabi
ahaanba?

Jawaab:

Waxa suurtogal ah in dadka intooda
badan ay in ku fulin maamuli karaan dhanjafkooda iyagoo
qaadanaya dawo iyo iyagoo
isbeddelo yar yar oo fudud ku samaynaya
habnololeedkooda. Kala hadal dhakhtarkaaga
sida aad si ka fiican ugu maamuli karto dhanjafkaaga Ramadaanta
ka hor. Haddii xanuunku
yahay mid aan loo adkaysan karin oo aan
si kalena loo maamuli karin in la iska daayo
soonka mooyaane si loo wax loo cuni karo

wakhtiyo cayiman loona qaadan karo kiniinno,
waa la samayn karaa iyadoo laakiin shuruuddu
tahay in la bixiyo fidyo.

4. Qof cadaadiska dhiiggiisu sareeyo ama hooseeyo ma soomayaa?
Jawaab:

Qofka cadaadiska dhiiggiisa heer
fiican ku haya isagoo wax ka beddelaya habnololeedkiisa
iyo/ama qaadanaya dawo wuu
soomi karaa. Qofka soomaya dhakhtarkiisa
ayaa siin kara talo ku sahabsan dawo qaadashada soonka ka
hor. Qofka cadaadiska dhiigguusi hooseeyo, ee laakiin sida kale caafimaad
qaba, isaguna wuu soomi karaa. Marka cadaadiska dhiiggu
hooseeyo waa in si fiican loo
cabbo dareere oo la cuno cunto leh cusbo ku filan.

5. Soonku ma dhibaato ayuu keenaa marka uur la leeyahay?
Ma qasabbaa in
la soomo marka uur la leehayay?

Jawaab:
Awoodda ay haweenka uurka lihi u
leeyihiin in ay soomaan way kala duwan tahay.

Waxa jira calaamado xanuun oo dhawr ah oo
muujiya marka aanay habboonayn in la soomo
inta uurka la leeyahay.
Haddii haweenay ay
dareemayso in ay leedahay awood iyo caafimaad ay ku soomi
karto, gaar ahaan bilowga
uurka, way samayn kartaa.

Haddii aanay
dareemayn in ay leedahay caafimaad ay ku
soonto waxa shareecada Islaamku ay oggolaansho buuxa u siinaysaa
in aanay soomin, si
aan caafimaadkeeda iyo ka ilmaha midkoodna
khatar u gelin. Waxa ay soonka dhaafay qallayn kartaa wakhti
dambe.

Waamaxay Xukunka soonta Ramadaan?

Xukunka soonku waa waajib faral ah waxaana u daliil ah aayaadka
Quraanka ee uu Ilaahay inoogu tilmaamayo,
{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ }
{Kuwa xaqa rumeeyayoow waxa laydinku waajibiyey Soonka sidii
loogu waajibiyey umadihii idinka horeeyey inaad ka dhowrsataan
Rabbigiin}
Sidoo kale Nabigu (N.N.K.H) wuxuu dhahay: Islaamka waxa lagu kor
dhisay shan (Tiir): Qirida in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin

Ilaahay mooyee, Muxamadna yahay Rasuulkiisa, Salaada oo la oogo, Sakada oo la bixiyo, Xajka (oo la tago) iyo in Ramadaan la soomo. Waxa kale oo uu dhahay Nabigu: (Hadaad aragtaan sooma). Muslimiintuna waxay ku kulmeen in Soontu tahay faral, uuna yahay mid kamid ah tiirarka Islaamka, cidii dafirta faralnimadiisana ay gaaloobayso, marka laga reebo cida ku barbaartay wadan shisheeye oo aan garanaynin axkaamta Islaamka, isagana waa loo sheegayaa, marka lagu xujeeyo ee loo sheego haduu diido wuu gaaloobayaa, cida uga tagta caajisnimo ama wahsina wuxuu ku sugan yahay halis, culumada qaarna waxay u arkaan inuu yahay gaal ridoobay hase ahaatee waa danbiile faasiq ah oo halis ku dul sugan.

(2) Ma gaaloobayaa cida soonta uga tagta wahsi iyo caajisnimo sida qofka ka tagay salaada oo kale?

Cida soonka uga tagta wahsi iyo caajisnimo ma gaaloobayo, sababtuna waxa weeye ruuxu muslim ayuu yahay illamaayo laga helayo daliil tilmaamaya inuu ka baxay Islaamnimada, mana jiro daliil tilmaamaya in cida soonta uga tagtay caajisnimo ama wahsi uu yahay gaal. Dhanka kale cida salaada cayaar uga tagta inuu gaalyahay waxa kusoo arooray daliil Quraanka ah, sunnada Rasuulka iyo hadalkii saxaabada Ilaahay raali haka ahaadee. Wuxuu dhahay Cabdillaahi ibnu Shaqiiq: (Waxay ahaayee saxaabadii Rasuulku kuwo aan u arkayn gaalnimo hadii qofku camal uu ka tago marka laga reebo salaada) hase ahaatee ruuxa soonka ka tagay isagoo ay ka

tahay wahsi iyo caajisnimo waa in loogu nasteexeeyo inuu soomo haduuse diido waa in la ganaaxo illamaayo intuu ka soomayo.

(3) Waa maxay tiirarka Soontu?

Tiirarka soontu waa hal mid oo ah; in Ilaahay lagu caabudo katagida laga tagayo waxa soonta jabiya laga bilaabo marka waagu dillaaco illamaayo ay Qoraxdu ka dhacayso. Waabarigana waxa loojeedaa Oogta danbe maaha Oogta hore, Oogta danbena waxay kaga duwantahay Oogta hore sadex arrimood:

1. Oogta danbe waxay ku fidsantahay cirka halka Oogta hore ay tahay mid laydi ah oo ku fidsan bari Illaa galbeed balse Oogta danbe waxay ku fidsantahay waqooyi illaa koonfur.
2. Oogta danbe mugdi kama danbeeyo ee waxa sii koraya iftiinka illaa Cadceedu kasoo baxdo, halka Oogta hore ay madawdahay isagoo leh shucaac ama falaadho.
3. Oogta danbe waxay cadaantiisu ku xidhiidhsantahay Cirka, halka Oogta hore mugdi u dhaxeeyo isaga iyo Cirka. Oogta danbe ayaana Salaada subax iyo soonkuba waajibaan.

(4) Waa maxay xikmada loo waajibiyey Soonka?

Waynu garanaynaa xikmada loo waajibiyey soonta waa in Ilaahay lagu caabudo lagana dhawrsado, dhawrsaniduna waa inaad ka tagto waxa la xarimay, waxayna si guud u koobsanaysaa in lala yimaado waxa lagu faray iyo inaad ka tagto waxa lagaa reebay, wuxuuna dhahay Nabigu (N.N.K.H): (Ruuxaan ka tagin hadalka beenta ah

<<xun>> iyo ku dhaqankeeda, Ilaahay dan kama laha inuu ka tago cunadiisa iyo cabidiisaba) Sidaa darteed waxa ku waajiba ruuxa sooman inuu ku kaco waxa la faray kana tago waxa laga reebay oo ah hadal iyo ficilba, waa inaanu dadka xamanin, beena ka sheegin, uuna cidna isku dirin sidoo kalena aanu wax xaaraan ah uusan iibinin waana inuu ka fogaado dhammaan waxa xaaraanta ah, haduu qofku sidaas uu sameeyo bil dhan, naftiisu way toosnaanaysaa sanadka oo dhan. Hase ahaatee waxa wax laga xumaado ah in Dad badan aanay kala duwanayn markuu soomanyahay iyo markuu afursanyahay, waxay ku dul suganyihiin dhaqankoodii ahaa inaanay camal san qabanin mid xuna ka dhawrsanin, mana la dareemayo inay ilaalinayaan soonta, arrimaahaasina soonta ma jabiyaan laakiin way yareeyaan xaga ajarka, waxaana laga yaabaa in hadii lays barbardhigo in camalka xun uu bato oo uu waayo ajarkiiba (abaal marinta fiican).

(5) Goormaa la soomaa Ramadaan?

Waxa Ramadaan la soomaa marka la arko bisha Ramadaan oo bilatay ama bisha Shacbaan oo 30 maalmood ku dhamaatay. Waxaana u daliila xadiiska Nabiga ee uu leeyahay; {Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana afura, haduu idinka daboolmana (arki waydaan) waxaad dhamaystirtaan bisha Shacbaan 30.}

(6) Ma laysku tiirin karaa Dayax gacmeed si loo arko bisha Ramadaan? Ma banaan tahay in la adeegsado waxa loo yaqaan (Dardiil) oo ah soo dhoweeyaha si loo arko bisha Ramadaan?

Ma banaana in laysku tiiriyo Dayax gacmeedka hadii aan bisha la arkin, balse hadii la arko bisha haba la adeegsado Dayax gacmeed way sugmaysaa aragtidaasi sida ku cad xadiiska Nabiga (Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana afura). Sidoo kale hadii la adeegsado soo dhoweeyaha wax dhib ah malaha, dadkuna waagii hore way adeegsan jireen, aragtidaas soo dhoweeyuhuna wuxuu soo galayaa macnaha xadiiska Nabiga (Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana Afura).

(7) Miyey ka sugnaatay Nabiga (N.N.K.H) duco gaar ah oo uu akhriyo cida aragta bisha dhalatay?

Haa, wuxuu dhahayaa: { اللهم أهله علينا بالأمن والإيمان والسلامة والإسلام ربي وربك الله هلال رشد وخير}{Ilaahayoow! Bishu hanoogu dhalato amaan, iimaan, nabadgalyo iyo Islaamnimo, Rabigay iyo Rabigaa waa Ilaahay, Bil hanuun iyo khayreed} Waxa kusoo arooray ducadan laba xadiis walow saxiixnimadooda ay culamdo ka hadlaan. Sida markaa ka muuqata xadiiska waxa ducadan la akhrinayaa kolka la arko bisha laakiin cida maqashay ee aan arkin looma sharciyayn inuu ku ducaysto.

(8) Soonta bisha Ramadaan ma waxaan la soomnaa Sacuudiga? Mise Wadanka aan daganahay ayaan la soomnaa?

Culumado way isku khilaafeen hadii bisha laga arko wadan Muslim ah miyey wadamada kale ee aan arkin bisha ku waajibaysaa soontu mise kuma waajibayso? Sida loo badanyahay waxa khilaafkaas loo celinayaa Culumada. Hadii labada Wadanba laga wada arkay dhalashada bisha way midoobayaan sida hal dal oo kaliya balse haday labada wadan is khilaafaan midkastaba ayagaa iskood isku xukumaya, waana siduu doortay Shiikha Islaamka Ibnu Taymiyah (I.R.H), waaana sida ka muuqata Kitaabka, Sunnada iyo Qiyaastaba. {فَمَن شَهِدَ مِنكُمُ الشَّهْرَ فَلْيَصُمْهُ ۖ}{Ruuxiise xaadira (jooga) ha soomo} Sida laga fahmayo Aayadan cidii aan joogin kuma waajibayso soontu. Sidoo kale Nabiguna wuxuu dhahay: (إذا رأيتموه فصوموا، وإذا رأيتموه فأفطروا) (Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana afura) Waxaynu xadiiskana ka fahmaynaa in hadii aynaan arkin aanay soonku waajibayn.. Qiyaastuna waxay inoo tilmaamaysaa in la soomo ama la afuro waxa loo tiirinyaa wadan kastaba kaligii ayadoo la cuskanayo Qorax soobaxa iyo Qorax dhaca, Tusaale ahaan dadka dagan wadamada Bari way kahor soomaan kana hor afuraan dadka dagan Galbeedka dunida, sidoo kale Cadceedu waxay kusoo hor baxdaa wadamada Bariga. Hadii markaaba ay kala horeeyaan xaga soonta maalinta iyo afurtaba sidaas oo kale ayey u kala horeynayaan soonka Ramadaan iyo afurtaba. Laakiin hadii labada dagmo ama labada magaalo ay isku dal yihiin sidoo kalena ay isku khilaafeen xilliga la soomayo ama la afurayo waa in Madaxda iyo Culumada loo celiyo si khilaafka meesha looga saaro. Sidaa darteed waxa lala

soomayaa wadankaad joogtid lana afuraysa. Waxaana lamid ah soonta maalinta Carafo.

(9) Waa maxay xukunka cida ku soontay Wadan Muslim ah kadibna u safarta wadan kale oo Muslim ah ayadoon bishii laga arkin oo soomay in kabadan 30 casho? Ama cida ka safartay Wadan aan Ramadaan usoo galin oo tagta Wadan laga sooman yahay?

Hadii Qofku ka safro Balad Muslim oo uu tago Wadan Muslim ah oo kale oo aan wali laga afurin wuxuu ahaanayaa mid sooman oo la afura wadanka uu tagay, sababtoo ah soonku waa maalin ay dadku soomaan, maalinta ciida Al-adxahuna waa maalinta dadku ay ka ciidayaan baladkaas, waa sidaas xitaa hadii ay maalin dheeraad ay noqoto macnaha xitaa hadii uu soomo wax kabadan 30 casho. Waxa lamid hadii Ruuxu u safro wadan aanay wali Qorraxdii dhicin wuxuu ahaanayaa mid sooman xitaa dhawr saacadood dheeraad ha noqdaane sababtuna waxa weeye Wadanka aad u safartay lagama arkin bisha, nabiguna wuxuu ina faray inaynaan soomin oo afurin illamaayo aynu ka aragno bisha. { {صوموا لرؤيته، وأفطروا لرؤيته}{Ku sooma aragtidiisa, kuna afura argtidiisa}

Cidiise u safarta wadan laga soomanyahay oo bishii laga arkay wuu la soomayaa, waxaanu soo qallaynayaa wixii ka tagay. Hadii ay ka tagtay hal maalin wuxuu soo qallaynayaa hal maalin sidoo kale haday ka tagtay wax hal maalin ka badan wuxuu soo qallaynayaa maalmihii ka tagay. Wuxuu soomayaa laba casho haduu Wadankaa ku soomay 28 casho waa hadii ay bishu ku dhamaatay 30 casho balse hadii ay

bishu ku dhamaato 29 casho ama labada wadan midkood ay bishu ku dhamaatay 29 casho wuxuu soomayaa hal maalin kaliya. Hadaadse u safartay Wadan gaaleed ood ku aragto bisha waad soomaysaa, hadaadse aanad arkin bishii waxaad u celinaysaa soonkaaga meeshii aad katimid.

(10) Soontu yay ku waajibtaa?

Soontu waxay ku waajibtaa qof kasta oo Muslim ah, Qaangaadh ah, Garaad leh, Awooda, Deegaan ah kana madhan waxa manciya soonta. Ruuxa lixdaa sifo laga helo ayey Soontu waajib ku tahay.

1. Ruuxu waa inuu Muslim yahay sababtoo ah gaalka lagama aqbalayo haduu soomo balse haduu soo Muslimo looma haysanayo cibaadooyinkii uu katagay, waxa daliil u ah inaan gaal waxba laga aqbalayn aayadan; {وَمَا مَنَعَهُمْ أَن تُقْبَلَ مِنْهُمْ نَفَقَاتُهُمْ إِلَّا أَنَّهُمْ كَفَرُوا بِاللَّـهِ وَبِرَسُولِهِ} {Waxa diiday in laga aqbalo sadaqadooda maxaa yeelay waxay ka gaaloobeen Ilaahay iyo Rasuulkiisa..} Kumana waajibayso inuu soo gudo wixii katagay haduu gaalku Islaamo waxaana u daliila aayadan; {قُل لِّلَّذِينَ كَفَرُوا إِن يَنتَهُوا يُغْفَرْ لَهُم مَّا قَدْ سَلَفَ}{Ku dheh kuw gaaloobay haday ka reebtoomaan gaalnimada waxa loo dhaafi wixii hor maray}. Laakiin haduu ku dhinto gaalnimo waxa lagu ciqaabayaa tagida uu ka tagay cibaadooyinka waxaana u daliila aayadan; {قَالُوا مَا سَلَكَكُمْ فِي سَقَرَ ﴿٤٢﴾ وَلَمْ نَكُ نُطْعِمُ الْمِسْكِينَ ﴿٤٤﴾ لَمْ نَكُ مِنَ الْمُصَلِّينَ ﴿٤٣﴾} {Maxaa idin galiyey naarta Saqara (42) Waxay ku jawaabi kamaanan ahayn kuwa Tukada (43) Kamanaan ahayn kuwa quudiya Masaakiinta(44)} Sidaa daraadeed tagida ay ka tageen Salaada iyo Sakada iyo

Cibaadooyinka ayaa keenay oo sababay in la caddibo maalinta qayaame. Haduu ruux gaal ahaa Islaamo kuma waajibayso inuu qalleeyo maalmihii soonka katagay, hadii uu Islaamo Shan iyo tobanka Ramadaan masoo qallaynayo 14 ka maalmood ee tagay.

2. Ruuxu waa inuu garaad leeyahay maxaa yeelay qofka aan caqli lahayn sida xanuunka waalida ama qof ku dhashay jirro caqligu aanu koraynin laguma laha soon iyo salaad toona.
3. Ruuxu waa inuu qaan gaar yahay, waxaana lagu qaan gaadhaa 3 arrimoo iyo mid u dheer dumarka, waxayna kala yihiin: Waa inuu buuxiyo sanadka Shan iyo Toban sano ama Waa in timo kasoo baxaan inta u dhaxaysa cawrada iyo xundurta ama waa in ay biyo yimaadaan riyo ama soo jeed labadoodaba, waxa kale oo gabadha u dheer in ay hesho dhiiga caadada <Xaydka>. Sidaa awgeed qofku wuxuu ku qaangaadhaa arrimahaas kor ku xusan xitaa waa hadii aanu buuxinin da'da shan iyo toban sano, dumarka qaarna waxay dhiiga xaydka helaan 15 sano kahor kolkaa waxa ku waajibaya soonka iyo cibaadooyinka kale oo dhan.
4. Ruuxu waa inuu awood u leeyahay inuu soomo, cidii aan awood u lahayn inay soonto waa laba Nooc: (a) In awood darradaasi ay tahay mid joogto ah sida; Ruuxu gaboobay oo waayeel ah ama qof xanuusanaya oo aan la rajaynayn inuu xanuunka ka bugsado, kolkaas ruuxaas aan awooda u lahayn inuu soomo waa inuu miskiin quudiyaa maalin kasta, hadii bishu tahay 30 maalmood wuxuu quudinayaa 30 miskiin hadayse tahay 29 maalmood wuxuu quudinayaa 29 miskiin. Quudinta miskiinkuna waa laba qeyboood; Qeybta koowaad waxa weeye

inuu bixiyo tusaale ahaan Bariis ama gallay qaydhin oo aan la karinin kolkaa waxa lagu miisaamaya Rubuc saac (Miisaankii Nabiga) oo u dhigma miisaanka maanta Laba kiilo iyo Afartan garaam 2,40Kg. Miisaankii Nabiguna wuxuu quudin jiray Afar qof , waxaana wanaagsan in cuntada aad bixinayso aad ku darto iidaan maadaama ay qaydhintahay oo aanay karsanayn. Qeybta Labaadna waxa weeye; inaad kariso cunto ku filan 30 miskiin bishaas, hadayse bishu ku dhamaato 29 maalmoodna waa inaad u kariso bishaas cunto ku filan 29 miskiin. (b) Nooca labaad ee aan awooda u lahayn inuu soomo waa sida qof laga rajo qabo inuu xanuunka ka kacayo, kaas waxaynu leenahay waa inaad soo qallaysaa maalmihii kaa tagay.

5. Ruuxu waa inuu deegaan yahay oo aanu safar ahayn, haduu safar yahay wuu afuri kara sida ku cad aayadan: {فَمَن كَانَ مِنكُم مَّرِيضًا أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ فَعِدَّةٌ مِّنْ أَيَّامٍ أُخَرَ ۚ} {Ruuxii kale ee idin kamidka ah ee buka ama safar ah waxaa korkiisa ah inuu soomo ayaamo kale} Waxaana ruuxaa Musaafirka ah u wanaagsan inuu soomaanaado haduu awoodayo. Laakiin hadii aanu awoodayn waa inuu afuro oo uuna qalleeyo maalmaha ka tagay.
6. Qodobka lixaad waxa weeye inuu ruuxu ka madhan yahay waxyaalaha diida soonka, wuxuuna qodobkan gaar u yahay haweenka. Soonku waajib ayuu ku yahay haweenka hadii aanay ahayn mid heshay dhiiga caadada <xaydka> ama Nifaaska, haday hesho dhiiga xaydka ama nifaaska kuma waajibayo soonku ee way soo celinaysaa maalmihii lagu lahaa oo way qallaynaysaa siduu dhahay Nabigu: (أليست إذا حاضت لم تصل ولم تصم) (Haday Xaydo miyey tukataa ama soontaa) Macnaha hadii

haweenaydu ay hesho xayd ma soomayso ee way soo gudaysaa ayaamaha ka tagay sida qofka bukay ee xanuunka ka bugsaday.

- Waxaana u baahan laba arrimood in la baraarujiyo: Waa mid koowaad oo ah in haweenka qaar ay daahirto (xayd ama nifaas ka daahirto) habeenka oo ayna ogtahay inay daahirtay laakiin aanay soomin ayadoo filaysa in hadii aan la qubaysanin aanay soontu ku waaibayn sidaas maaha ee hadii ay habeenka daahir noqoto oo xitaa aanay qubaysan waa ku waajibayaa soonku, soonteeduna way sugnaanaysaa xitaa hadii aanay qubaysanin marka laga reebo qorraxda oo soo baxdo mooyee.
- Haweenka qaarna ayagoo sooman oo qorraxdii dhacday oo ay afurtay balse aanay salaadii Maqrib tukan ayey heshaa Caadadii markaa qaarbaa dhaha; Soontii umaysan ansixin balse sidaas maahee soonteedu waa caadi oo waa saxiix .

Lixdaa sifo ee aan kor kusoo sheegnay hadii qofka laga helo waxa ku waajiba soonta bisha Ramadaan, umana haboona inuu afuro illamaayo xilligeeda laga gaadho.

(11) Candhuuftu miyey jabisaa Soonta?

Candhuuftu ma jabiso Soonta hadii la liqo.

(12) Xaakada oo la liqo miyey Jabisaa Soonta?

Hadii Ruuxu uu liqo Xaako isagoo Sooman waxa jira laba Qawl (xukun) oo kala ah:-

(a) Culumada qaar ayaa tidhi; Xaakadu way jabinaysaa Soonta sida Cuntada iyo Cabitaanka.

(b) Kuwo kalena waxay dhaheen: Ma jabinayso ee waxay qaadanaysaa xukunka Candhuufta oo kale. Hadayba Culumadau wax isku khilaafaana waxa loo noqonayaa Kitaabka iyo Sunnada Nabiga, Asalna waxa ah in xaakadu Soontiisa waxba yeelayn sida Candhuufta oo kale. Waxaana Muhiim ah in aan Candhuufta iyo Xaakadaba lasoo jiidin oo aan la keenin Afka, hadayba dhacdana waa in la tufaa.

(13) Waa maxay xukunka Cadayga iyo is qurxinta qofka Sooman?

Run ahaantii Cadyga iyo is Qurxinta qofka sooman waa Sunne maalintii iyo habeenkiiba, waxaanu guud ahaan soo gudo galayaa xadiiska Nabiga ee ah;

{السواك مطهرة للفم، مرضاة للرب}

(Cadaygu waa nadiifiyaha Afka iyo raali galinta Rabbiga).

Iyo sidoo kale Xadiiskii kale ee Nabiga (لولا أن أشق على أمتي لأمرتهم بالسواك مع كل وضوء) (Hadii aanan Umadayda ku cuslaynayn waxaan fari lahaa Cadayga wayso kasta).

Sidoo kale is qurxintu way u banaantahay qofka sooman maalintii iyo habeenkiiba, isqurxintaasi haba noqoto bukhuur, cadar ama saliid. Balse waxa kaliya ee aan la ogolayn ayaa ah in Sanka laga qaato Bukhuurka, maxaa yeelay wuxuu bukhuurku u gudbayaa Afka kadibna Caloosha. Sidaa awgeed ayuu Nabigu (N.N.K.H) u dhahay:

{بالغ في الاستنشاق إلا أن تكون صائماً}

(Biyaha sanka gali -xilliga waysada- mar aad Soomantahay mooyaane.)

(14) Waa maxay xukunka Macjuunka lagau cadaydo Ilkaha xilliga Soonka?

Macjuunka ama Dawada Cadaygu waxay noqonaysaa laba xaaladood, ta koowaad waxa weeye in Macjuunku ama Dawada Cadaygu tahay mid xoogan oo u gudbaysa Caloosha, taasi ma banaana waxaana daliil u ah Xadiiskii uu Nabigu lahaa (Biyaha sanka gali -xilliga waysada- mar aad soomantahay mooyaane.) Maxaa diiday in xilliga Soonka biyo sanka xoog loo galiyo sababtu waxa weeye in aanay biyuhu u gudbin Caloosha oo markaas Soontiisii ka jabin, sidaa darteed hadii Macjuuku yahay mid xoogan oo Caloosha u gudbi kara ma banaana, ama ugu yaraan waa Karaahiyo.

Xaalada labaad waxa weeye in Macjuunku yahay mid aan xooganayn oo aan Caloosha u gudbayn, taasi wax dhib ah malaha maxaa yeelay Afka biyo ayaa lagu luqluqdaa xilliga Waysada taasina waxba ma yeesho Soonta, sidaa darteed wuxuu qaadanayaa xukunka luqluqashada biyaha ee xilliga Waysada.

(15) Cuntada oo la dhadhamiyo miyey burisaa Soonta?

May, dhadhamiska Cuntadu ma burinayso Soonta hadii aanu liqin, hase ahaatee waa in ay xaajo laga furan waayo tahay, hadayba xaajo keento oo ay waxun Calooshaada galaan markaas Soontu kaama jabayso.

(16) Ma banaan tahay in Ninku la cayaaro ama dhunkado Xaaskiisa isagoo Sooman?

Way u banaanatahay in Ninku la cayaaro ama uu dhunkado Xaaskiisa isagoo Sooman, marka laga reebo inuu ka cabsado in ay Biyo ka yimaadaan, hadayba Biyo yimaadaan way burtay Soonkaasi, haduu Soonkaasi yahay Ramadaana waa inuu sii soomanaad inta ka hadhsan Maalintaas, waana inuu soo qalleeyaa maalintaas. Balse hadii Soontaasi aanay ahayn Ramadaan wuu iska Afuri karaa maalintaas, hadii ay tahay Soon waajib ahna waa inuu soo qalleeyaa hadayse ahayd Soon Sunne ahna waxba masii wadayo soonkiisa ee wuu Afuri karaa, dhibna malaha haduu soo qalleeyo.

(17) Xanta iyo isku dirka Dadku miyey Jabisaa Soonta?

Xanta iyo isku dirka Dadku ma jabiyaan Soonta balse waxay yaraysaa Ajarka ruuxa Sooman, Nabiguna (N.N.K.H) wuxuu dhahay: (من لم يدع قول الزور، والعمل به، والجهل فليس لله حاجة في أن يدع طعامه وشرابه) {Cidii aan ka tagin hadalka kiisa xun iyo ku dhaqankiisa iyo Jaahilnimada, Ilaahay dan kama laha inuu ka tago Cuntadiisa iyo Cabitaankiisa9.}

(18) Waa maxay Xukunka ruuxa Markhaati Beenaalaha ah ee Sooman?

Markhaati Beenaaluhu waa Danbiyada ugu waaweyn waana Qofka oo u marag kaca waxaanu ka war qabin, mana buriso Soonka laakiin Ajarkiisa ayey yaraynaysaa.

(19) Cuntada xad dhaafka ah ee la diyaariyo xilliga Afurada miyey yaraynaysaa Ajarka Soonta?

Ma yaraynayso Ajarka Soonka balse cuntada iyo cabitaanka xad dhaafka ah asal ahaa ma banaana siduu Allah (S.W) uu dhahay: { وكُلُوا وَاشْرَبُوا وَلاَ تُسْرِفُوا إِنَّهُ لاَ يُحِبُّ الْمُسْرِفِينَ}{Cuna oo Caba hana xad gudbina maxaa yeelay Ilaahay ma jecla kuwa xad gudba} hadiiba Cuntadu badantahay waxa wanaagsan in la sadaqeeyo.

(20) Waa maxay xukunka Qofka Soontu kaga jabto xidhiidh gogoleed oo uu la wadaago xaaskiisa Maalinta Ramadaan?

Hadii Soontu tahay Ramadaan oo ay ku jabto galmo waxa ku waajiba Ruxaas kafaaro gud ah: Inuu xoreeyo Qoor, haduusan awoodin waa inuu soomo laba bilood oo isku xigta, haduusan awoodayn waa inuu quudiyo 60 Miskiin.

GUNAANAD

Mahad dhammaanteed illaahay baa leh.

Allaha noogu nimceeyay nimcooyin fara badan oo aan la koobi karin. Allaha na siiyay arag, maqal, eaqli iyo xoog. Allaha nagu hanuuniyay diinta toosan ee Islaamka.

Allaha ii fududeeyay in aan qoro buuggan ka hadlaya; ku raaxaysiga nolosha. Intaas kadibna waxaan u mahad eelinayaa Nebi Muxammed scw midka u ilmeeyay aragtideena dartiisa, midka marka maalinta qiyaamo qof walba dhahayo "Nafsii Nafsii" isaguna dhahayo: "Yaa rabbi umatii, umatii." Midka ina baray farxada dhabta ahi, waxa ay tahay iyo sida aan ugu raaxaysan lahayn nolashan adduunka ah. Alle ayaa mahad oo dhan iska leh, ayna nimcadiisa ay ku dhamaadaan waxyaalaha wanaagasan oo dhami